Australian Government
Department of Immigration and Border Protection

TIS TRANSLATING AND INTERPRETING SERVICE

Su’aalaha badanaa lays-weydiiyo ee dadka aan-Ingiriisiga ku-hadlin

Soomaali

Maxay yihiin adeegyada ay bixiso TIS National?

TIS National waxay siisaa taleefan degdeg ah, taleefan hore loo-ballamiyey iyo adeegyada turjumaanka goobta dadka aan ku hadlin Ingiriisiga iyo haya’daha iyo ganacsiyada u baahan inay la xiriiraan macaamiishooda aan-Ingiriisiga ku hadlin. Adeegyadaas waxay awoodsiiyaan dadka aan-Ingiriisiga ku hadlin inay si xor ah uga helaan adeegyada iyo macluumaadka Australia.

Dadka aan-Ingiriisiga ku hadlin waxay heli karaan turjumaanada taleefanka degdegga ah ayagoo ka wacaya TIS National 131 450. Sidaas baddalkeeda, haddii aad si toos ah ula xiriirto haya’dda waxay kuu diyaarin karaan turjumaan ayagoo ku matalaya.

Yaan kula xiriiri karaa TIS National?

In ka badan 20,000 macaamiisha haya’daha, oo ay ka mid yihiin Department of Immigration and Border Protection, waxay ka diiwaangashan yihiin TIS National:

- Wasaaradaha dowlad-goboleedyada iyo federaalka
- dowladaha hoose
- aqoonyahanada daawada iyo caafimaadka
- farmashiisteyaasha
- shirkadaha adeegyada
- shirkadaha isgaarsiinta
- adeegyada degdegga ah
- adeegyada sharciyeed
- bixiyeyaasha adeegga dejinta iyo bulshada.

TIS National ma balan-qaadi karto in haya’dda aad u baahan tahay inaad la xiriirto inay aqbasho wicitaannada turjumaanku-caawiyo oo ka socda TIS National.

Goormaan wici karaa TIS National?

Adeegga turjumaanka taleefanka oo degdegga ah ee TIS National waxaa la helaa 24ka saac maalintii, maalin kasta oo sannadka ah.

Haya'dda aad la xiriirayso waxaa laga yaabaa in la heli karo inta lagu jiro saacadaha shaqada ee joogtada ah ayadoo saacadaha shaqaduna u kala duwan yihiin haya'daha. Badiba haya'daha Australia waxay shaqeeyaan inta lagu jiro saacadaha shaqada ee caadiga ah inta u dhaxaysa 9 am–5 pm, Isniinta ilaa Jumcaha. Haya'do badan ayaan la heli karin fasax-weynaha dadweynaha.

Maxaan fili karaa markaan waco 131 450?

Markii aad la xiriirto TIS National, waxaa ku salaami doona xiriiriyaha TIS National oo Ingiriisi ku-hadlaya kaas oo ku weydiin doona turjumaanka luqadda aad doonayso. Ka dib markaad codsato luqadda, waxaa lagu gelin doonaa hakad inta uu xiriiriyuhu raadinayo turjumaan diyaar ah. Fadlan ku jir hakadka xataa haddii uusan jirin muusiga hakadka.

Haddii turjumaanka luqaddaada la heli karo, xiriiriyuhu wuxuu kugu xiri doonaa turjumaan wuxuuna ku weydiin doonaa haya'dda aad doonayso inaad la xiriirto. Fadlan diyaarso magaca haya'dda, lambarka taleefankooda lagala xiriiro iyo macaamiilkaaga ama lambarka akoonkaaga ee aad haya'dda ku leedahay (hadduu jiro) markaad wacayso TIS National.

Xiriiriyeyaasheenu waa inay yihiin kuwo dhexdhexaad ah kugulama talin karaan haya'dda aad la xiriirayso. Markii lagugu xiro turjumaanka, turjumaanku kulama yeelan karo sheekaysi aan rasmi ahayn maaddaama looga baahan yahay inay ahaadaan kuwo dhexdhexaad ah intay socoto shaqooyinka turjumaanka oo dhan.

Turjumaanku wuxuu u sheegi doonaa xiriiriyaha TIS National ciddaad rabto inaad la xiriirto xiriiriyahu wuxuu sii wadayaa inuu waco kuguna xiro adiga iyo turjumaanka haya'daad codsatay.

Haddii turjumaan luqaddaada ah aan la heli karin, xiriiriyuhu wuxuu ku oranayaa inaad mar labaad soo wacdo. Haddaad ku hadasho hal luqad wax ka badan, waxaad codsan kartaa turjumaan luqadda kale ah.

Maxaan samayn karaa haddii aan garanayo turjumaanka ay TIS National igu xirto?

Haddii aad ogaato inaad garanayso turjumaanka, adaa iska leh go'aankaaga haddii aad doonayso inaad sii wadato kulanka turjumidda. Haddii aadan doonayn inaad sii wadato isla turjumaankii, u sheeg xiriiriyaha TIS National ama haya'dda joojina wicitaanka.

Ma codsan karaa turjumaan lab ama dheddig ah?

Haa. Haddii aad doonayso turjumaan jinsi gaar ah, u sheeg xiriiriyaha TIS National ama haya'dda aad la xiriirayso sida ugu dhaqsaha badan. TIS National waxay isku dayi doontaa inay ku siiso turjumaanka jinsiga aad codsatay.

Ma codsan karaa turjumaan diin ama asal gaar ah ka soojeeda?

Maya. Xiriiriyeyaasha TIS National waxay u qoondeeyaan shaqooyinka turjumaanada ayadoo ku salaysan heerka aqoonsigooda iyo helitaankooda mana dooran karaan turjumaan ayadoo ku salaysan diintooda ama asalka dhaqankooda.

Waxaan doorbidaa inaan adeegsado turjumaan qof ahaan ah. Sidaasi ma suurtagalbaa?

Haa. TIS National waxay bixisaa adeegyada turjumaanka goobta. Haddii aad u baahato turjumaanka goobta, waa inaad la xiriirto haya'dda aad u baahan tahay inaad la xiriirto adoo u maraya TIS National adigoo adeegsanaya turjumaanka taleefanka weydiinayana inay kuu diyaariyaan turjumaanka goobta.

Waxaan u baahanahay inaan la xiriiro adeegyada degdegga ah. Maxaan samayn karaa?

Mar kasta si toos ah u wac 000 haddaad u baahato inaad si degdeg ah ula xiriirto adeegyada Ambalaaska, Boliiska ama dab-demiska. Khadka adeegyada degdegga ah ee 000 waxay wici doonaan TIS National waxayna kugu xirayaan turjumaan ayagoo adeegsanaya khadka mudnaanta ee 24ka saac maalintii, maalin kasta oo sannadka ah.

Adeegyada TIS National ma u lacag la'aanbaa dadka aan-ingiriisiga ku hadlin?

Haa. Badiba adeegyada turjumaanka ee TIS National waa u lacag la'aan dadka aan Ingiriisiga ku-hadlin. Guud ahaan haya'dda aad la xiriirayso way aqbali doontaa qarashka adeegga. Haya'daha qaarkood iyo dhaqaatiirta waxay xaq u leeyihiin turjumid lacag la'aan ah ayagoo maraya TIS National.

Haya'daha qaarkood ma aqbalaan wicitaanada ka yimaada TIS National, si kastaba ha ahaatee haddii aad si toos ah u wacdo haya'dda waxay awooddaan inay dib kuugu soo wacdo turjumaanka taleefanka.

Haddii aad doonayso inaad la xiriirto haya'dda aan ahayn macaamiisha TIS National isla markaasna aysan haya'ddu doonayn inay aqbasho qarashka adeegga, waxaad samaysan kartaa akoon shaqsi waxaadna iska bixin kartaa adeegga. Si aad saas u samayso, u sheeg turjumaanka markaasna xiriiriyeyaasheena ayaa kaa caawin doona sidaad akoon uga samaysan lahayd TIS National. Waxaad u baahan doontaa kareedhit kaar si aad u samaysato akoon shaqsi.

Dokumantiyada ma la iiga turjumi karaa TIS National?

Maya. TIS National ma bixiso adeegga turjumaada qoraalka dokumantiyada ganacsiga ah.

Wasaaradda Department of Social Services (DSS) waxay siisaa adeegga turjumidda dokumantiyada muwaadiniinta iyo soo-galootiga Australianka ah ee xaqa u leh kuwaas oo si joogto ah u degaya Australia. Si wax looga ogaado adeegyadan, la xiriir bixiyaha deegaankaaga ee Adult Migrant English Program (AMEP).

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan khiyaarada kale ee turjumidda adigoo la-xiriira National Accreditation Authority for Translators and Interpreters (NAATI).

Waa maxay kaalinta turjumaanka TIS National?

Kaalinta turjumaanka waa inuu ku turjumo erayada lagu wada-hadlayo ee luqaddaada sida ugu saxsan oo suurtagalka ah.

Turjumaanadu ma bixiyaan wax talooyin ah kumana weydiinayaan su'aalo aan ka ahayn waxa uu codsanayo xiriiriyaha TIS National ama qofka aad la hadlayso.

Turjumaannada TIS National waxaa xukuma koodhka adag ee damiirka. Koodhka wuxuu xukumaa dhaqankooda xirfad-yaqaanimada ah waxaana ku jira waajibaadyo badan kuwaas oo ay ka mid yihiin:

- Asluub xirfad-yaqaanimo
- qarsoodinimo
- Aqoon
- dhexdhexaadnimo
- saxnaan
- caddaynta xadka kaalinta
- maintaining professional relationships
- horumar xirfad-yaqaanimada
- wadajirak xirfad-yaqaanimada.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Xeerka Anshaxa waxaa laga heli karaa Australian Institute of Interpreters and Translators (AUSIT).

Sidee baan u adeegsan karaa turjumaanka sida ugu habboon?

Waxaad adeegsan kartaa turjumaanka TIS National si firfircoon adigoo:

- diyaarsada dhammaan macluumaadka aad uga baahan tahay wicitaankaaga ka hor intaadan wicin TIS National
- dulqaata oo ka suga turjumaanka inuu dhammeeyo turjumidda ka hor intaadan hadlin mar labaad
- adeegsada jumlooyinka gaagaaban
- ka-dheeraanta adeegsiga af-suuqa ama hadal xirfadeed kuwaas oo ay adag tahay in la turjumo
- garashada kaalinta turjumaanka
- aan weydiinayn turjumaanka wax talooyin ah ama inuu kuu qareeno
- la-socod-siinta turjumaanka, haya'dda ama TIS National si degdeg ah haddii ay kugu adag tahay fahmidda turjumaanka.

Sidee baan u siiyaa ra'yi-celin TIS National?

Si loo bixiyo ra'yi-celinta ku saabsan adeegga TIS National, turjumaanka ama xiriiriyaha fadlan ka wac TIS National taleefanka 131 450. Markii lagugu xiro turjumaanka, u-sheeg xiriiriyaha inaad doonayso inaad siiso ra'yi-celin TIS National. Ra'yi-celintaada waa duubi doonaa waxaana loo gudbin doonaa kooxda ay khuseyso ee TIS National si loo tixgeliyo.